Victims Services
Attorney General & Justice

Xeer-qoraalka Xuquuqyada Dhibbanayaasha

(Xeerka Xuquuqyada iyo Taageerida Dhibbanayaasha ee 2013)

Somali/Soomaali

Haddii aad dhibbane ka tahay dembi, waxaad qabtaa xuquuqyo. Xuquuqyadaan waxaa lagu magacaaba Xeer-qoraalka Xuquuqyada Dhibbanayaasha. Kani waa waxa ku qoran xeer-qoraalka:

Xushmayn

Waxaa lagula dhaqmi doonaa si xushmo, sharaf iyo naxariis leh. Mar walba dhaqankaaga waa la xushmayn doonaa.

Macluumaad ku saabsan adeegyada

Sida ugu dhaqsi badan ayaa laguu sheegi doonaa adeegyada kala duwan ee ku caawin karo, ay ku jiraan hannuuninta iyo adeegyada sharciga.

Helidda adeegyo

Haddii aad u baahan tahay caawinaad caafimaadeed, hanuunin iyo sharciyeed waad heli doontaa haddii uu jiro.

Macluumaad ku saabsan baaritaanka dembiga

Haddii aad codsato, waxaa laguu sheegi doonaa sida uu u socdo baaritaanka booliska. Laakiin mar-mar waxaa jiri doono waxyaabo uu booliska kuu sheegi karin.

Macluumaad ku saabsan xeer-ilaaliyaha

Ciqaab-marinta wuxuu ku saabsan yahay hor-geynta dembiilaha maxkamad. Kani waxaa sameeyo booliska, ama, arrimaha aad u xun, Agaasimaha Xeer-ilaalinta Shacbiga.

Dhibbane ahaan, waxaa laguu sheegi doonaa:

- waxyaabaha dembiilaha lagu eedeeyey AMA sababta dembiilaha weli dembiga LAGU eedeynin;
- go'aan walba uu xeer-ilaliya ka garo beddelka ama joojinta eedeynta;
- taariikhda iyo goobta lagu qaban doono dhegeysiga maxkamadda;
- natiijada ugu dambeyo ee maxkamadda ay ku jirto wixii rafcaan ah ama ciqaab xabsi-geyn walba ee la baxshey.

Haddii xeer-ilaaliyaha uu ka fikiraayo inuu beddelo ama joojiyo eedeynta adiga ayey markii horey kula hadli doonaan haddii dembiga ahaa:

- dembi galmo aad u xun, AMA
- kugu reebay dhaawac jireed, niyadeed ama maskaxeed.

LAAKIIN xeer-ilaaliyaha uma baahno inuu kula hadlo haddii:

- aadan rabin inaad ka hadasho dembiga, AMA
- ay ku heli karin.

Macluumaad ku saabsan noqoshada markhaati

Haddii loo baahan yahay inaad maxkamad caddeyn ka bixiso markhaati ahaan, waxaa laguu sheegi doonaa SIDA ay maxkamadda u shaqeeyso iyo WAXYAABAHA lagaa rabo inaad sameyso.

Xiriir lama lahaan doontid dembiilaha

Intii ay arrintaada maxkamadda hor-taalo waa lagu ilaalin doonaa sidii dembiilaha iyo markhaatiyaasha dembiilaha kula xiriirin.

Ilaalinta sirtaada

Cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka waxaad ku hayn kartaa sir aysan ka eheen markii ay maxkamadda si kale sheegto.

Hawlaha maxkamadda maxkamad-saarid ka hor

UMA baahnid inaad tegto dhegeysiga u-diriska (sida maxkamad-saarid yar) ama hawl kale ee maxkamad ka hor intii maxakmadda bilaabanin AYSAN KA EHEEN haddii ay maxkamadda sidaa kugu amarto.

Soo celinta alaabtaada ka dib markii loo isticmaalo caddeyn ahaan

Haddii booliska ama xeer-ilaaliyaha qaadey alaab aad leedahay si ay caddeyn uga noqdaan maxkamad-saarid, waxaad xaq u leedahay in laguu soo celiyo sida ugu dhaqsi badan.

Ilaalintaada

Haddii aad u baahan tahay in lagu ilaaliyo u sheeg booliska ama xeer-ilaaliyaha markii dembiilaha soo codsado damiinasho lagu soo daayo.

Shuruudaha gaarka ah ee damiinashada

Waxaa laguu sheegi doonaa shuruudaha gaarka ah ee damiinashada la siiyo dambiilaha, kuwaasoo loogu talagalay in lagu badbaadiyo adiga ama qoyskaaga, sida shuruud oo dembiilaha ku amraayo inuusan adiga kula xiriirin.

Go'anka damiinashada

Haddii aad dhibaane ka eheed xad-gudub galmeed ama xad-gudub kale ee aad u xun waa laguu sheegi doonaa haddii dembiilaha sii-deyn damiinasho la siiyo iyo inkale.

Bayaanka wax-yeellada dhibbanaha

Xaalado gaar ah, waxaad awoodi kartaa inaad maxkamadda u sheegto sida dembiga saamayn kugu yeeshey iyo waxaa lagu siin doonaa caawinaad iyo taageerid si aad kani u sameyso. Kani waxaa lagu magacaaba bixinta 'bayaanka wax-yeellada dhibbanaha'.

Markii dembiilaha la sii daayo

Haddii dembiilaha ku jiro xabsi waxaa laguu sheegi karaa haddii xabsiga laga sii-deyn doono, ka baxsadey xabsiga ama hal maalin la sii deeyo.

Markii dembiilaha soo codsado sii-deyn sharafeed

Waxaad ra'yigaaga bixin kartaa haddii dembiilaha codsado sii-deyn sharafeed.

Gar-gar maaliyadeed

Haddii dhaawac ku gaarey fal dembiyeed aad u xun awgeeda, waxaad xaq u lahaan kartaa gar-gaar maaliyadeed.

Macluumaad ku saabsan hab-socodka cabashada

Waxaad samayn kartaa cabasho haddii aad u maleyso in la qancinin xuquuqyadaada hoos yimaado Xeer-qoralka iyo waxaad weydiin kartaa sida cabashada loo sameeyo.

Haddii aad dhibbane ka tahay dembi waxaad qabtaa xuquuqyo

Ka wac Khadka Gar-gaarka Dhibbanaha 1800 633 063 si aad u hesho macluumaad iyo taageerid.

Xeer-qoraalka Xuquuqyada Dhibbanayaasha

Gobolka New South Wales waxaa ka jiro Xeer-qoraalka Xuquuqyada Dhibbanayaasha si loo ilaliyo iyo loo abaabulo xuquuqyadaada haddii aad dhibbane ka tahay dembi. Xeer-qoraalka wuxuu ka dabakhmaa dhammaan waaxyada dawaladda ee NSW. Wuxuu xittaa ka dabakhmaa hay'adaha aan dawladda qayb ka eheen iyo qandaraaslayaasha (aysan ku jirin qareenada iyo takhaatiirta), waxaana maal-geliyey Gobolka oo taageerid siiyo dhibbanayaasha. Xeer-qoralku wuxuu sheegaayaa sida loo baahan yahay in lagula dhaqmo iyo laguu cawiyo haddii aad dembi dhibbane ka tahay. *Xeer-qoraalka wuxuu ku qoran yahay Xeerka Xuquuqyada iyo Taageerida Dhibbanayaasha ee 2013*.

Waa kuma dhibbane dembi?

Xeerka Xuquuqyada iyo Taageerida Dhibbanayaasha ee 2013, dhibbanaha waa qof wax-yeello gaarey kadib markii lagu sameeyey fal dembiyeed.

Maxaan sameeyaa haddii aan u maleeyo in xuquuqyadeeda hoos yimaado Xeer-qoraalka la qancinin?

1. Waa inaad dhibaatada u sheegtaa qofka aad la macmiisho. Caadi ahaan dhibaatada sidaas ayaa loo xallin karaa.
2. Haddii weli qanci weyso, waxaad xaq u leedahay inaad qofka ka codsato inay kuu sheegaan sida waaxdooda cabasho laga sameeyo. Waaxda wuxuu awooda inuu kuu qaban-qaabiyo turjubaan ama gar-gaar kale haddii aad u baahato. Waxaad qofka ku taageero ka codsan kartaa inay kugu caawiyaan samaynta cabasho. Kani wuxuu ahaan karaa saaxiib ama shaqaale.
3. Haddii weli qanci weyso ka dib markii waaxda u baaro cabashadaada waxaad la xiiiri kartaa Adeega Dhibbanayaasha. Hawshooda waa inay kugu caawiyaan cabashadaada iyo kuu sheegaan wixii laga qaban karo.

Faah-faahinta xiriirka

Telefoonka	1800 633 063
Aaga magaalada Sydney	(02) 8688 5511
Khadka Xiriirka Aboriginal	1800 019 123
Fakis	(02) 8688 9632
Saacadaha	8.00subaxnimo ilaa 6.00habeenimo, Isnin ilaa Jimco (kuma jiro maalmaha fasaxa)
Email'ka	vs@agd.nsw.gov.au
Bogga internetka	www.lawlink.nsw.gov.au/vs
Warqad walba u dir	The Commissioner, Victims Services, Locked Bag 5118, Parramatta NSW 2124

© © Gobolka New South Wales ayadoo loo maraayo Adeegyada Dhibbanayaasha, NSW Waaxda Xeer-ilaaliyaha Guud iyo Caddaalada, Juunyo 2003 (Dib loo Casriyeyeey Luulyo 2013). Dokumentigaan nuqul ayaa laga samaysan karaan markii loo isticmaalaayo ujeeddoo shakhsiyadeed, wax-barasho iyo dawladeed. Fasax waa in laga helaa Waaxda markii arrimo kale loo isticmaalaayo.

Macluumaadkaan qaab kale ayaa lagu heli karaa.

Dokumentigaan waxaa diyaariyey Adeegyada Dhibbanayaasha sidii macluumaad guud ahaan loo isticmaalo.

ISBN 978 1 922121 27 1 (FS10k • 07/2013)